

XEERKA WASIIRKA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA

3 Setembre 1968, Ir. 210.

Ansixinta liiska kala hor-marinta ka-qaybgalayaasha tartanka ee shan jago notaayo ee lagu soo bandhigay X. W. ee 10 Luulyo 1968, ee Ir.165.

WASIIRKU

MARKUU ARKAY Qodobka 83 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY Qodobka 14 ee Sharciga 3 Juunyo 1962 ee Ir.14 oo ku saabsan Nidaamka Xukuumadda iyo isbeddellada dambe ee lagu sameeyey;

MARKUU ARKAY Sharciga 15 Febraayo 1961 ee Ir.8 kuna saabsan ku shaqeynta xirfadda notaayonimo, gudaha Soomaaliya;

MARKUU ARKAY Xeerka Sharciyeed, ee 2 Maarso 1962, Ir.1 kuna saabsan Nidaamka Notaayada;

MARKUU ARKAY Xeerka Wasiirka, ee 16 Abriile 1968, ee Lr.103 oo caymaha xarumaha iyo tirade notaayayaasha ka hawlgelaya gudaha Soomaaliya;

MARKUU ARKAY Xeerka Wasiirka ee 10 Luulyo 1968, ee Lr.165, kaas oo soo bandhigaya tartan imtixaan loo gelayo shan jago oo notaayo;

MARKUU ARKAY Dood-qoraaleedka (maxadarka) Guddiga imtixaanka;

MARKUU XAQIJIYEY sida nidaamka ah oo ay u dheceen hawlgallada tartanka;

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKAN:

Qod. 1

Waxaa la ansixiyey liiska magacyada tartamayaasha ka qaybgalay tartan loo galay shan jago notaayo, oo isu dabayaal sida ay u kala badiyeen, kaas oo natiijadiisu noqotay sida soo socota:

1. — Doktor Benvenuto Francesco Isaaq — oo galay kaalinta kowaad.
2. — Doktor Cusmaan Nuur Cali — oo galay kaalinta labaad.
3. — Doktor Muuse Xuseen Sadiiq — oo galay kaalinta saddexaad.
4. — Doktor Maxamed Faarax Siyaad — oo galay kaalinta afaraad.
5. — Doktor Maxamed Hassan Nuur — oo galay kaalinta shanaad.
6. — Doktor Yaslam Cabdalla Saciid — oo galay kaalinta lixaad.

Qod. 2

Shanta ugu horreysa, oo ah kuwa ku guuleystay tartanka, waxa ay daw u leeyihiin in ay u qaddimaan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, muddo 7 maalmood gudahood oo ka bilaabata shaacinta Xeerkan, bayaanka kala doorbididda, sida ku qeexan qodobka 16 ee Xeerka Sharciyeedka 2 Maarso 1962 ee Lr.1, xarumaha soo socda oo ah kuwa hadda bannaan:

Liiska xarumada notaayo iyo tirade jagooyinka bannaan:

Beledweyne	—	hal	jago
Berbera	—	hal	jago
Boosaaso	—	hal	jago
Burco	—	laba	jago
Kismaayo	—	saddex	jago
Gaalkacyo	—	laba	jago

Hargeysa	—	laba	jago
Baydhabo	—	laba	jago
Muqdisho	—	saddex	jago
Marka	—	hal	jago

Qod. 3

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa isla maalinta lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Setember 1968.

WASIIRKA
Aadan Shire Jaamac